

## **Macluumaad sharci (Rechtsauskunft) ee habraaca codsiga ilaalinta caalamiga ah**

Dadka sameeyay codsi ilaalin caalami ah (internationaler Schutz) oo dacwaddoodu ka socoto Bundesamt für Fremden und Asyl (Xafiiska Federaalka ee Arimaha ajnabiga iyo magangelyada- BFA), waxay laga bilaabo 12.06.2026 xaq u leeyihiin inay helaan macluumaad sharci intii lagu guda jiro habraaca.

Marka la bixinayo macluumaadka sharci, codsabayaashu waxay helayaan warbixin ku saabsan sida habraacu u socdo iyo xuquuqdooda iyo waajibaadkooda inta uu socdo habraacu. Waxaa lagu taageeraa gelitaanka nidaamka magangelyada, waxaana la siinayaa awood ay ku gaaraan go'aanno xo ogaal ah oo ku saabsan dacwaddooda, isla markaana ay si waqtigeeda u gutaan waajibaadkooda iskaashi.

Macluumaadka sharci wuxuu ku salaysan yahay hagaha EUAA ee ku saabsan bixinta macluumaadka sharci ee midowga yurub. Waxa uu ka kooban yahay gudbinta macluumaad guud oo lagu bixiyo qaab kooxeed, iyadoo la isticmaalayo luqad fudud, waxaana lagu daray suurtagalnimada wada-hadallo gaaban oo gaar ah.

Si loo helo macluumaadka sharci, waa in codsi loo diraa BFA iyadoo la adeegsanayo foom online ah oo ku yaalla [www.asylum.austria.at](http://www.asylum.austria.at) (laga bilaabo 12.06.2026).



<https://citizen.bmi.gv.at/at.gv.bmi.fnsbfaweb-p/bfa/public/Rechtsauskunft>

Dadka soo gudbiyay codsiga macluumaadka sharci isla markaana ka tirsan kooxda loo qoondeeyay, waxaa la soo xiriiri doonta BBU GmbH waxaana lagu casuumi doonaa ballan.

Macluumaadka ku saabsan habraaca iyo xuquuqda iyo waajibaadka waxaa marka hore lagu bixiyaa kulan kooxeed. Haddii loo baahdo, waxaa ka dambeeya suurtagalnimada wada-hadallo gaaban oo gaar ah.

Kooxaha waxaa loo habeeyaa iyadoo lagu salaynayo nooca habraaca iyo luqadda codsabayaasha.

Kulamada waxaa lagu qabtaa iyadoo ay jirto taageero turjubaan.

Waxyaabaha ku jira macluumaadka sharci:

- Macluumaad ku saabsan habraaca lagu qiimeynayo codsiga
  - Habraaca ilaalinta caalamiga ah
  - Habraaca lagu go'aamiyo waddanka xubinta ka ah Midowga Yurub ee mas'uulka ka ah baaritaanka codsiga loogu jiro ilaalinta caalamiga ah

○ Habraaca Xuduuda

- Macluumaad ku saabsan tallaabooyinka habraaca ka dib gudbinta codsiga
- Macluumaad ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka ee habraaca
- Macluumaad ku saabsan dammaanadaha habraaca ee dadka leh baahiyo gaar ah (tusaale: carruur kali ah, dhibanayaasha jirdilka, dhibanayaasha ka ganacsiga dadka)
- Macluumaad ku saabsan go'aaminta da'da iyo dammaanadaha carruurta aan lala socon
- Macluumaad ku saabsan xogta la ururiyay iyo astaamaha biometriga
- Macluumaad ku saabsan muhiimadda meesha ay joogaan xubnaha qoyska
- Macluumaad ku saabsan shuruudaha, habka iyo baaxadda wareysiga shaqsiyeed
- Macluumaad ku saabsan xogta, caddeymaha iyo dukumentiyada caawin kara
- Macluumaad ku saabsan cawaaqibta ka dhalan karta haddii la jabiyo waajibaadka iskaashi
- Sharaxaad ku saabsan suurtagalnimada racfaanka iyo macluumaad ku saabsan xaqa joogitaanka inta racfaanku socdo
- Macluumaad ku saabsan xaqa helitaanka talo sharci iyo wakiilnimo bilaash ah inta lagu jiro habraaca racfaanka

Codsiga macluumaadka sharci waxaa la gudbin karaa isla markiiba ka dib diiwaangelinta codsiga ilaalinta caalamiga ah ama wakhti kasta inta uu habraacu ka socdo BFA.